

HUMAN RIGHTS WATCH

# "Loo Jeebeeyay Sidii Maxaabiis"

## Tacaddiyada ka dhanka ah Dadka Cudurada Dhimirka Qaba ee ku nool Somaliland


# SOO KOOBID
# TALOOYIN MUHIIM AH



***Bukaannada ayaa gudaha ku jiray muddo dheer. Xarumaha ayaan u diyaarin bukaannada sidii ay bulshada dib ugu laaban lahaayeen, bukaannaduna ma helaan wax talooyin ah ama daaweyn dhanka maskaxda ah. Marka laga saaro xarumaha, bukaannada lama siiyo wax dawo ah, mana jiraan adeegyada bukaan socodka.***

Dhakhtar Xanuunada Maskaxda ah, Hargeysa, Janaayo 27, 2015

**Nin bukaan ah oo joodari ku jiifa bannaanka qeybta xanuunka dhimirka ee Cisbitaalka Hargeysa ee xarunta Somaliland, halkaasi oo ay ku dhacayaan kuleylka qoraxda iyo waxyaabo kale, 30-kii bishii Luuliyo 2015.**



# “Loo Jeebeeyay Sidii Maxaabiis”

© Sawirka, Zoe Flood ayaa si gaar ah ugu qaaday Human Rights Watch



**Cabdi oo 35 jir ah, ayaa muddo 20 bilood ah ku jiray xarun gaar loo leeyahay oo lagu daweeyo xanuunka dhimirka, taasoo ku taalla magaalada Hargeysa. Qoyska Cabdi ayaa rumeysnaa inuu xanuunsan yahay, ayna suuragal tahay inuu qabo xanuunka dhimirka, mana aanay garaneyn wax ay sameeyaan. Sidaa awgeed, walaashiis oo dareentay in aanay guriga ku daryeeli karin ayaa geysay xarunta.**

**Cabdi oo 35 jir ah, muddo laba sano ahna lagu hayay xarunta Macruuf Relief Organization, ayaa sheegaya in asaga oo aan ogolaansho laga haysan ay qoyskiisa halkaa geeyeen, uuna jeebeysnaa 14 bilood. Waxaa uu dharkiisa ka qaadayaa qol yar oo uu hadda ku nool yahay, kuna ag yaalla guriga qoyskiisa ee magaalada Hargeysa, 27-kii bishii Luuliyo 2015.**

Cabdi – ayaa si lamid ah inta badan dadka la rumeysan yahay in ay qabaan xanuunka dhimirka ee Somaliland – waxaa 15 bilood ay silsilad lugaha uga xirneyd gudaha xarunta, asaga oo inta badan ku dhex xirnaa qolkiisa. "Wax adag ayay ahayd in maalintii oo dhan aad ku jirto gudaha," ayuu yiri Cabdi, oo intaa ku daray "Waxaan tirinayay maalmaha ilaa intii aan xarunta kasoo baxay."

Shaqaalaha xarunta ayaa siiyay Cabdi dawo xanuunka dhimirka ah, ayagoo aan wax ogolaansho ah ka helin, ama aan u sharixin sababta uu ugu baahan yahay iyo sida ay u saameyn karto. Cabdi ayaa yiri "Markii xarunta la i geeyay, waxaa la ii qoray dawada olanzapine, waxaana



isticmaalayay mudadii aan halkaa ku jiray oo dhan, kalkaaliyaha caafimaadkuna iima uusan sharixin sababta." Balse wuxuu ku qasbanaa inuu qaato. "Mararka qaar, haddii aad diido dawada ama aad muujiso daandaasi, ilaalada ayaa ul iyo dharbaaxo kula dhacaya." ayuu yiri Cabdi.

Cabdi iyo qoyskiisaba looma sheegin xogta ku aaddan cudurka laga helay. Cabdi awood uma uusan lahayn inuu ka baxo xarunta. Walaashii ayaa go'aamisay marka ay tahay in loo ogolaado aaditaanka guriga.

Markii ay Human Rights Watch Cabdi kula kulantay guriga walaashiis oo Hargeysa ku yaalla, saddex maalmood kaddib markii xarunta laga soo saaray, ayaa waxaa ka muuqday nafis la dareemi karo. Cabdi ayaa yiri "Aad ayaan ugu faraxsanaa inaan ka baxo xarunta, waxaan halkaasi ku dareemayay inaan ahaa sidii maxbuus, markii aan kasoo baxayna, waxaan dareemay sidii qof xoriyadiisa dib u helay."

**Bukaan hurda asagoo labada lugood silsilad looga xiray xarunta gaarka loo leeyahay ee Raywan, Hargeysa, 29-kii bishii Luuliyo 2015. Si la mid ah xarumaha kale ee gaarka loo leeyahay, laguna hayo dadka qaba ama looga shakiyay xanuunka dhimirka, bukaannada ayaa inta badan la jeebeeyaa muddo dheer.**

Ma jirto xog rasmi ah oo ku saabsan tirada dadka qaba xanuunka dhimirka ee Somaliland. Balse daraasado la sameeyay ayaa muujinaya in tirada dadkaasi ay aad u sareyso, qaarkoodna ay xaaladdoodu xuntahay, iyadoo loo tiirinayo rabshadihiii ka dhashay dagaalkii sokeeye, cunista badan ee jaadka shaqa la'aanta baahsan, iyo adeegyada caafimaad oo aan jirin. Sidaa oo ay tahayna, dadka qaba xanuunka dhimirka ayaa inta badan ay dowladdu faraha ka qaaday, iyagoo iskood u noolaada ama inta badan ku tiirsan qaraabo aan macluumaad badan ka haysan xaaladooda caafimaad, isla markaana aanan haysan cid caawisa ama ka taageerta qofkooda qaba xanuunka dhimirka.



**Qaar ka mid ah qaraabada iyo asxaabta oo doonaya in ay galaan qeybta xanuunka dhimirka ee Cisbitaalka Hargeysa, oo xilligaasi ay ku jireen ku dhawaad 40 rag ah iyo 25 dumar ah, Hargeysa 29-kii bishii Luuliyo 2015.**



Marka laga reebo afarta xarumood ee dadweynaha ee caafimaadka maskaxda, kuwaasi oo aan haysan dhaqaale ku filan, isla markaana ku baahsan Somaliland, ayaa waxaa sare u kacay tirada xarumaha gaarka loo leeyahay, si gaar ahna ugu soo batay magaalada Hargeysa. Halkii ay bukaannada ka siin lahaayeen nasasho, soo kabasho iyo daweyn, ayaa xarumahaasi dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahayba waxaa ay inta badan yihiin goobo dadka lagu xiro, isla markaana lagula kaco daweyn aanay ogoleyn, xarig sharci darro ah oo aan ku iman ogolaansho madax bannaan.

Warbixintan oo ku saleysan cilmi baaris laga sameeyay magaalooyinka Hargeysa, Berbera iyo Gabiley, ayaa waxa ay eegeysaa tacaddiyada loo geysto dadka qaba ama looga shakiyo xanuunka dhimirka ama xaaladaha kale ee maskaxda, ee ku jira xarumaha dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahay. Mudadii u dhexeysay bishii Oktoober 2014-ka iyo July 2015-ka, Human Rights Watch ayaa booqatay laba xarumood oo ah kuwa dadweynaha laguna daweeyo xanuunka dhimirka, lix xarumood oo ah kuwa gaarka loo leeyahay iyo hal xarun oo adeegsata dhaqanka iyo diinta, sida ay sheegteyna daweysa bukaannada la jiifiyo. Human Rights Watch ayaa wareysatay 115 qof, oo ay ka mid yihiin 47 qof oo looga shakiyay ama qaba xanuunka dhimirka, kuwaas oo xarumo lagu hayay ama soo maray xarumahaasi. Waxay ogaatay in intooda badan ay wajahaan tacaddiyo. Waxaa tacaddiyadaasi ka mid ah xarig aan loo meel dayin, jeebeyn, aflagaado, xadgudub jirka ah, dawada oo qasab lagu siiyo, cariiri iyo xaalado xun. Hannaanka asaasiga ah, dusha kala socoshada garsoorka iyo qaababka




Haweeney bukaan ah oo taagan halka laga galo qeybta dumarka qaba xanuunka dhimirka ee Cisbitaalka Hargeysa ee xarunta Somaliland, 29-kii bishii Luuliyo 2015.



ay cadaalad ku heli karaan ayaan dhammaantood jirin. Inkastoo haweenka qaba xanuunka dhimirka ay sidoo kale xarumaha lagu hayo iyo bulshadaba kala kulmaan tacadiyo ba'an, ayaa warbixintan waxaa inta badan diiradda lagu saaray ragga, maadaama xarumaha intooda badan ay rag ku jiraan.

**Dhakhtar Mustafa Xasan Daahir iyo kalkaaliso Maryam Xasan Daahir oo ku hawlan bukaan socodka xarunta caafimaadka dhimirka ee Cisbitaalka Hargeysa, ayaa sheegay in ay u adeegaan qiyaastii 150 bukaan socod joogta ah, Hargeysa, 29-kii bishii Luuliyo 2015.**

Qoysaska iyo ehellada ayaa ah taageerada ugu weyn ee ay helaan dadka qaba xanuunka dhimirka, balse waxa ay inta badan la harjadaan sidii ay dadkaasi u siin lahaayeen kaalmo wax ku ool ah, maadaama aanay jirin kaalmo ay ka helaan bulshada, sida adeegyada caafimaadka bukaan socodka iyo la talin ku dhisan ogolaansho xog ogaal ah oo madax bannaan. Xubnaha qoyska ayaa inta badan haysta xog khaldan, waana ay kooban tahay xogta ay ka haystaan caafimaadka maskaxda iyo waxa ay yihiin dawada iyo daryeelka ku haboon, waxaana ay ka hortagaan faquuqa bulshada. Qaar ka mid ah ayaa ku tiirsan qaababka dhaqanka iyo diinta ama dawooyinka dukaamada lagu iibiyo, kuwaasi oo ay ka iibsadaan farmashiyayaal aanan nidaamsaneyn oo aan shati haysan. Sidaa darteedna, dadka qaba xanuunka dhimirka ayaa inta badan waxaa lagu jeebeeyaa guryaha. Human Rights Watch ayaa ogaatay dhawr arrimood oo ka dhigaya dadka qaba ama looga shakiyay xanuunka dhimirka kuwo aad ugu nugul in xarumaha la geeyo oo lagu xadgudbo. Waxaa arrimahaasi ka mid ah; tirada dadka qaba xanuunka dhimirka oo badan, qoysaska ay kasoo jeedaan dadka qaba xanuunka dhimirka oo aan helin taageero ku haboon oo ay u fidiso dowladda ama bulshada, iyo ayadoo aan xog wanaagsan laga haysan caafimaadka maskaxda. Maadaama ay jirto baahi ballaaran



Maryam Xasan Daahir, oo kalkaaliso ka ah xarunta xanuunka dhimirka ee Cisbitaalka Hargeysa, xilli ay bukaan siineysay dawo, 29-kii bishii Luuliyo 2015.

oo ku aaddan xarumaha dadka lagu hayo, ayaa waxaa soo batay xarumaha gaarka loo leeyahay, kuwaas oo sheegta in ay bixiyaan daweyn xanuunka dhimirka ah, balse aan haysan haykalka sharci, nidaam ama dusha kala socosho.

Inta badan dadka qaba xanuunka dhimirka ee daraasadan lagu wareystay ayaa ahaa kuwo ayaga oo aan ogolaansho laga helin ay xarumaha geeyeen dad ehelkooda ah. Qaab kasta oo ay ku tagaan xarumaha bulshada ama kuwa gaarka loo leeyahayba, dadkaasi ayaan awood u lahayn in ay go'aansadaan marka ay ka baxayaan, sidaas oo ay tahayna ma jiro hannaan garsoor oo amraya in la hayo. Maxkamada heer degmo ee Hargeysa ayaa amartay in dad qaba xanuunka dhimirka la geeyo saddex ka mid ah xarumaha gaarka loo leeyahay, wallow aan qaab sharci ah loo marin xukunkaasi, isla markaana aan ogolaansho xog ogaalnimo ah laga helin qofka, ama aanu kasoo hor muuqan maxkamad, ayada oo ay intaa dheertahay in aanu jirin baaritaan maskaxeed ama waqti loo qabtay “daweynta.”

Inkastoo tiro yar oo ka mid ah dadka xarumaha lagu hayo ay sheegeen in ay halkaasi ka heleen xoogaa faa'iidooyin ah, qaar badan oo dadkaasi ka mid ah ayaa Human Rights Watch u sheegay in ay doonayaan in ay ka baxaan xarumahaasi bulshada ama gaarka loo leeyahay, balse ay qoysaskooda diideen in ay wataan ama aanay arkin dhakhtar u qalma inuu qiimeeyo xaalkooda uuna meesha ka saaro. Qaar ka mid ah dadka xarumahaasi lagu hayo ayaa sheegay in si qasab ah halkaasi loogu hayay muddo u dhexeysa hal bil ilaa shan sano. Dhammaan dadka xarumaha lagu hayo ee u warramay Human Rights Watch



**Qaasim oo 35 jir ah, oo xilliga sawirkan laga qaadayay silsilad ku xirnaa muddo afar bilood ah ayaa qol karantiil ah ku qaatay muddo todobaad ah, waxaana uu fadhiyaa asagoo ay silsilad uga xirantahay lugaha xarunta Horizon Social Assistance Development Organization, Hargeysa, 29-kii bishii Luuliyo 2015.**

ayaa sheegay in aanay helin xaakim ay uga dacwoodaan xarigooda.

Xarumaha gaarka loo leeyahay ayaa dadka ku haya deegaan aad u ilaalsan, ay ciqaab ka jirto, ayna ilaalada iyo shaqaalaha kale dadka halkaasi ku xiran kula dhaqmaan jadwal adag, karantiil dheer, iyo jeebayn.

Shaqaalaha caafimaadka iyo kuwa kale ee ka hawl gala xarumaha gaarka loo leeyahay ee ay booqatay Human Rights Watch, ayaa jeebeeya dadka halkaasi ku nool si ay u xakameeyaan, gaar ahaan marka la keenayo, ama marka ay ka cabsi qabaan in qofku uu daandaansado ama uu baxsado. Adeegsiga ballaaran ee jeebeynta ayaa ku abuura dadka xarumaha ku xiran dareen cabsi ah, sida uu sharaxayo kalkaaliye ka shaqeeya mid ka mid ah xarumaha gaarka loo leeyahay: "Bukaannada ayaa ka gadooda, ayaga oo dareemaya in laga qaaday xoriyada, waxa ay dareemaan in goobtu ay tahay sida xabsiga." Jeebeynta ayaa sidoo kale laga adeegsadaa qeybta xanuunka dhimirka ee Cisbitaalka Guud ee Berbera. Adeegsiga jeebeynta joogtada ah ee mudda dheer, iyo karantiilka mararka qaar ah, ee laga diiwaangeliyay xarumaha dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahay ee Somaliland, ayaa meel ka dhac ku ah heerarka asaasiga ah ee sharciga caalamiga ah, kaasoo mamnuucaya si xun ula dhaqmida taasoo noqon karta jirdil.

Qaar ka mid ah dadka xarumaha ku jira ayaa lagu qasbay dawooyin, ayagoo xoog iyo suuxin lagu siiyay. Shaqaalaha caafimaadka ayaa inta badan dadka xarumaha ku jira u qora dawooyin kuwa xanuunka dhimirka ah, ayaga oo aan u sheegin xanuunka laga helay, sababta loo siinayo dawada, isla markaana aan ogolaansho ka helin ama aan siin wax

bedel u ah. Mid ka mid ah 30-ka qof ee xarumahaasi ku nool ee daraasadan lagu wareystay ayaa ogaa cudurka laga helay. Afar keliya oo uu ka mid yahay Cabdi, ayaa yaqaanay dawada dhimirka ee loo qoray.

Ilaalada xarumaha ayaa mararka qaar ciqaaba dadka halkaasi lagu hayo, kuwooda jebiya sharciga ama diida amarada, ayagoo ku garaaca ul, dharbaaxo ama silsilad ku xira. Xarumaha dadweynaha iyo weliba saddex ka mid ah xarumaha gaarka loo leeyahay ayaa ah kuwo ay ka jirto nadaafad xumo, oo dayacan. Ugu yaraan laba xarumood oo kuwa gaarka loo leeyahay ah ayaa qolalka dadka lagu hayo waxa ay inta badan yihiin kuwo mugdi ah. Shaqaale yari iyo shaqaalaha oo aan tababar ku filan lahayn ayaa dhibaato ku haysay dhammaan xarumaha dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahay ee ay booqatay Human Rights Watch. Xilligan la joogo, waxaa Somaliland ka shaqeeya laba dhakhtar oo khibrad u leh xanuunka dhimirka, kuwaasi oo u dhexeeya saddexda iyo barka milyan ee qof ee lagu qiyaasay in ay halkaasi ku nool yihiin. Shaqaale aan si wanaagsan u tababarneyn ama aanba wax tababar ah soo marin, ayaa loogu tiirsan yahay daryeelka maalin waliba ee dadka ku jira xarumahaasi, gaar ahaan kuwa gaarka loo leeyahay.

Maamulka inta badan xarumahaasi ayaa bixiya adeegyo aad u yar, mana badna hawlaha micnaha leh ee ay u sameeyaan dadka lagu hayo, waxaana intaa dheer xaaladda xabsiga oo kale ah iyo rajo la'aanta. Mowlid, oo muddo 15 bilood ah ku xirnaa xarun gaar loo leeyahay ayaa sharaxaya: "Qoyskeygu waxa ay filayeen in xarunta ay i caawin doonto, balse dhab ahaantii waxa ay ahayd meel adag. Waxaan ahaa mid marwaliba fikiraya, oo fikiraya. Waxaan dareemayay sidii qof xabsi ku jira." Adeegyada ay bixiyaan xarumaha dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahay ayaa inta badan aan u diyaarin dadka lagu hayo sidii ay dib ugu laaban lahaayeen bulshada. Qaar badan oo dadkaasi ka mid ah ayaa waxaa xarumaha dib ugu celiyo qoysaskooda, mararka qaarna dhowr jeer ayaa lagu soo celiyaa.

Inkasta oo dadka qaba nooc ka mid ah xanuunka dhimirka ay ka faa'iideysan karaan daryeelka xarumaha caafimaadka, waa marka la geeyo ayagoo ogsoon isla markaana raali ka ah, ayaa inta badan dadka qaba xanuunka dhimirka waxaa taageerada ay u baahan yihiin, oo uu ka mid yahay daryeelka caafimaad, ay ka heli karaan bulshada dhexdeeda. Dhab ahaantii, qaar badan oo ka mid ah kuwa lagu wareystay daraasadan ayaa sheegay in ay doorbidi lahaayeen daweynta qaabka bukaan socodka ah, oo ay ku dhex helaan qoysaskooda. Dhakhtar qaabilsan xanuunka dhimirka, kana soo shaqeeyay xarumaha dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahayba, ayaa sheegay in inta badan bukaannada ku jira xarumaha gaarka loo leeyahay ay tahay in loola tacaalo qaabka bukaan socodka.

Mas'uuliyiinta Somaliland ayaa aqoonsaday in xanuunka dhimirka uu yahay dhibaato weyn, balse ilaa iyo hadda kuma aanay guuleysan in ay sameeyaan taageero kufilan adeegyada dadweynaha ee bukaan jiifka iyo bukaan socodkaba, dusha kala socoshada xarumaha gaarka loo leeyahay ee badanaya ama sameynta xarumo bulshada u adeega. Lacagta yar ee miisaaniyada dowladda u qoondeyso caafimaadka maskaxda ayaa la siiyaa xarumaha. Gargaarka caalamiga ah ee caafimaadkana waxa uu hareer maraa caafimaadka maskaxda.

Wax ka qabashada dhibaatada xanuunka dhimirka ee Somaliland ayaa u baahan dadaal muuqda. Mustaqbalka dhow, mas'uuliyiintu waa in ay xaqiijiyaan in si wanaagsan loo nidaamiyo oo dusha lagala socda xarumaha caafimaadka dhimirka ee dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahayba, si looga hortago, waxna looga qabto tacaddiyada waaweyn ee lagu qeexay warbixintan.

Mustaqbalka dhexe, mas'uuliyiinta Somaliland, oo gacan ka helaya hay'adaha caalamiga ah ee ay howlwadaaga yihiin iyo qurba joogta Somaliland, waa in ay joojiyaan dadka badan ee xarumaha la geynayo iyo sameynta xarumo bulshada u adeega oo dhimirka qaabilsan bixiyana adeegyada kaalmada ah. Dowladdu waa in ay la shaqeysaa dadka qaba xanuunka dhimirka, qoysaskooda iyo bulshada, si ay u xaliyaan faquuqa lala xiriiriyo xanuunka dhimirka, waana in ay sameysaa habab ku haboon oo ay dadka dhimirka qaba ay ku noolaanayaan ammaan, madax bannaani iyo sharaf bulshada dhexdeeda ah.

Somaliland waa in ay shaqaaleysiisa ayna tababartaa xirfad-layaal badan oo dhanka dhimirka ah iyo howlwadeennada bulshada, ayna xaqiijisaa bixinta daryeelka asaasiga ah ee caafimaadka maskaxda, ballan qaadida helitaanka daweynta iyo la talinta ku dhisan madax bannaanida iyo ogolaanshaha bukaanka, iyo xaqiijinta in si joogta ah oo nidaamsan loo helo dawooyinka dhimirka. Isla markaana dowladda oo gacan ka heleysa hay'adaha caalamiga ah ee ay howlwadaaga yihiin, waa in sidoo kale ay xoojisaa siyaasadaheeda hadda jira ee ku aaddan caafimaadka maskaxda, iyo hirgelinta qorshayaashaasi, oo ay ka mid tahay ansixinta xeerka caafimaadka maskaxda kaasoo waafaqsan heerarka caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha.

Marka la eego tirada badan ee dadka xarumaha dhimirka loo geynayo adeegsiga jaadka awgiis, mas'uuliyiintu waa in ay dadka daroogada adeegsada u sameeyaan adeegyo la mid ah kuwa heerka bulshada.

Somaliland waxa ay fursad u haysataa dhisida qaab taageero bulsho ah oo u fidinayo dadka horay u qabay xanuunka dhimirka, nidaaminta iyo dusha kala socoshada xarumaha gaarka loo leeyahay ee sheegtay in ay daweeyaan xanuunnada maskaxda, joojinta tacaddiyada iyo adeegsiga ciqaabta ay jeebeynta ka midka tahay, iyo ka hortaga tallaa-booyinka dadka lagu xareynayo xarumaha.

# TALOOYIN MUHIIM AH

## KU SOCOTO WASAARADDA CAAFIMAADKA

- **In si degdeg ah loo wanaajiyo xaaladdaha cisbitaallada dhimirka oo ay ka midka yihiin xarumaha gaarka loo leeyahay, si loo xaqiijiyo in la xushmeeyo xuquuqda aadanaha ee dadka qaba xanuunka dhimirka, ayadoo:**

    1. **Dib u eegista, ayadoo la kaashanayo xirfadlayaasha caafimaadka maskaxda iyo mas'uuliyiinta garsoorka, dhammaan kiisaska dadka lagu hayo xarumaha xanuunka dhimirka ee dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahay, iyo sii daynta daayaan kuwa qasabka lagu hayo;**
    2. **Sii daynta dhammaan dadka ogolaansho la'aantooda lagu hayo xarumaha xanuunka dhimirka ee halkaasi loo geeyay maadaama ay cunaan jaadka;**
    3. **Sameynta baaritaan degdeg ah oo madax bannaan kasoo ku aaddan dhammaan eedeymaha jirdilka iyo si xun ula dhaqmida ee ka dhaca xarumaha xanuunka dhimirka ee dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahayba;**
    4. **Mamnuucida adeegsiga jeebeynta iyo in waqtiga dheer la adeegsado qaab kasta oo xayiraya jirka qofka;**
    5. **Mamnuucida adeegsiga karantiilka;**
    6. **Ogolaanshaha in la adeegsado xariga qofka ama in dadka kale laga sooco keliya marka ay taasi tahay xalka ugu dambeeya, ayna muhiim u tahay in qofkaasi looga badbaadiyo dhibaato uu isu geysto ama uu dadka kale u geysto. Waa in xarigaasi uu qaadataa muddo aad u kooban, loona adeegsadaa dantaasi oo keliya. Qaabkaasi ma ahan in sidii la doono loogu adeegsado dadka qaba xanuunka dhimirka, waana in uusan ku dhisnaanin hayb sooc, si waafaqsan Axdiga Qaramada Midoobay ee ku aaddan Dadka Naafada;**
    7. **Mamnuucida adeegsiga dhammaan xariga loo adeegsado qaababka ciqaabta, xakameynta, ka aargoosiga ama tallaabo u wanaagsan shaqaalaha;**
    8. **In ku xareynta iyo joogista xarumaha dhimirka ee dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahayba ay ahaadaan kuwo ku dhisan ogolaanshaha qofka oo uu ku gaaray si xog ogaalnimo ah isla markaana madax bannaan;**
    9. **In xarig kasta oo aan ku iman ogolaansho uu suuragal noqdo keliya ayadoo la raacayo go'aanka hay'ad garsoor madax bannaan, oo hab sharci ah loo maray, kaasoo lagu saleeyay hab-dhaqan khatar muuqata gelin kara qofka naftiisa ama dadka kale, balse aan ku dhisneyn oo keliya in uu qofka qabo xanuunka dhimirka; waa in xarigaasi uu socdaa muddo kooban oo uu sharciga qabo, isla markaana marwaliba ay maxkamadu dib u eegis ku sameyn karto;**
    10. **Mamnuucida dawa siinta qasabka ah; qeexida xaaladdo gaar ah oo qofka aanu si kumeel gaar ah ogolaansho u bixin karin, marka ay xaaladdaasi oo kale taagan tahay, waxaa qofka la siin karaa daweyn degdeg ah, si la mid ah qofka aan xanuunka dhimirka qabin ee aan ogolaansho awoodin, waxaana muhiim ah in dawadaasi qofka loo siiyo si looga badbaadiyo xaaladda naftiisa khatarta gelineys, ama xaalad kale oo halis ah;**
    11. **Sameynta tilmaamo adag oo ku aaddan adeegsiga tallaabooyinka xakameynta ee aan ahayn jeebeynta iyo karantiilka; xaqiijinta in dhammaan xayiraada jirka ah ee qofka lagu sameeyo aanay ku iman inuu qabo xanuunka dhimirka, balse si waafaqsan Axdiga Qaramada Midoobay ee ku aaddan Dadka Naafada iyo in lagu saleeyo hab-dhaqan khatar muuqata gelin kara qofka naftiisa ama dadka kale; waa in la diiwaangeliyaa dhammaan dhacdooyinka qofka lagu sameeyo xayiraada jirka, isla markaana dib u eegis lagu sameeeyaa si loo xaqiijiyo in ay la jaanqaadeyso tilmaamaha;**

12. La tashiga Gudiga Qaran ee Xuquuqda Aadanaha, dadka naafada ah, iyo khubarada xuquuqda dadka naafada ah marka la sameynayo tilmaamaha noocaasi ah. Fulinta tilmaamahan waa in shardi looga dhigaa xarumaha uu diiwaangelinayo oo uu shatiga siinayo Gudiga Qaran ee Xirfadlayaasha Caafimaadka;
13. Xaqiijinta in dhammaan xarumaha dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahay ee daryeela dadka qaba xanuunka dhimirka ay hirgaliyaan sharciga ku aaddan qasab ku haynta, iyo tilmaamaha ku aaddan adeegsiga xakameynta ayadoo la keydinayo diiwaanka, la sameynayo tababaro, kormeerid, dib u eegis, baaritaano iyo in lala xisaabtamo shaqaalaha jebiya tilmaamahan;
14. Xaqiijinta in Wasaaradda Caafimaadka qeybteeda cudurada aan la isu gudbin ay hesho dhaqaale iyo shaqaale ku filan, si joogta ah ay u shirto, ayna la kulanto xirfadlayaasha caafimaadka ee madaxa bannaan, ayna howlaheeda ku darto goobaha loogu hagaagi karo caafimaadka maskaxda.

- Wanaajinta kaabayaasha qeybaha xanuunka dhimirka ee xarumaha dadweynaha, oo ay ka mid tahay dayactirka dhismooyinka burbursan, hagaajinta goobaha biyaha iyo faya dhowrka; xaqiijinta in dhul waasac ah ay helaan bukaanka u baahan dadaallada dejinta;
- Si wanaagsan in dib u qaabeyn loogu sameeyo qeybta cusub ee caafimaadka maskaxda ee Cisbitaalka Guud ee Gabiley, ka hor inta aan la furin;
- In si tartiib ah loo sameeyo xarumo caafimaadka maskaxda ah oo ay bulshada leedahay iyo qaababka kale ee ay bulshada ku taageeri karto dadka qaba xanuunka dhimirka si ay ugu dhex noolaadaan madax bannaani;
- Tababarida howlwadeennada daryeelka caafimaadka asaasiga ah si ay u aqoonsadaan ayna u maareeyaan xanuunnada guud ee maskaxda, gaar ahaan hababka loo dejiyo qofka qaba xanuunka dhimirka marka ay kacsan yihiin, sida in hadal qabow lagula hadlo. Tani waxaa lagu xaqiijin karaa ayadoo caafimaadka maskaxda lagu daro dhammaan barnaamijyada jira ee waaxda caafimaadka;
- In lagu daro qeybaha xanuunka dhimirka tababarka la siiyo howlwadeennada caafimaadka bulshada;
- Tababarida iyo shaqaaleynta xirfadlayaal badan oo dhanka xanuunka maskaxda ah, si loo wanaajiyo tirada ay isugu hagaagayaan dhakhaatiirta iyo bukaannada;
- In la qaado tallaabooyin lagu dhiirigelinayo in ay sii shaqeeyaan shaqaalaha xirfada leh ee tababaran;
- Xaqiijinta helitaanka dawooyinka dhimirka ee xarumaha dadweynaha si ay u helaan bukaan jiifka iyo bukaan socodka qaba xanuunka dhimirka, gaar ahaan kuwa bulshada ku dhex nool;
- Xaqiijinta in dadka qaba xanuunka dhimirka ay helaan kaalmo iyo macluumaad ay ku gaari karaan go'aan xog ogaalinimo ku dhisan oo ku aaddan qaabka loo daweynayo;
- Fududeynta kaalmo sharci oo ku filan, kuna haboon dadka qaba xanuunka dhimirka ee ku nool xarumaha;
- Ku amrida dhammaan xarumaha dowladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay in ay dadka qaba xanuunka dhimirka siiyaan macluumaad la heli karo, ayna uga warramaan xuquuqdooda iyo hannaanka ay dacwadooda ku gudbin karaan;

- **Ku darida tilmaamayaasha xanuunka dhimirka Qaabka Maareynta Macluumaadka Caafimaadka iyo xaqiijinta in macluumaadka la ururiyay la gaarsiiyo dhammaan xarumaha caafimaadka, oo ay ka mid yihiin kuwa gaarka loo leeyahay. Xaqiijinta in macluumaadka la keydiyo isla markaana lala wadaago saamilayaasha ay khuseyso, oo ay ka midka yihiin hababka nidaaminta iyo la xisaabtanka;**
- **Ayadoo lala shaqeynayo ururada naafada, dadka qaba xanuunka dhimirka, hay'adaha kale ee aan dowliga ahayn, iyo warbaahinta, waa in bulshada loo sameeyaa wacyi-gelin si loo fahansiiyo xaaladda dadka naafada ah, gaar ahaan kuwa qaba xanuunka dhimirka. Waa in la beegsadaa adeeg bixiyayaasha, laamaha ammaanka iyo dadweynaha;**
- **Cusbooneysiinta istaraatijayadaha hadda jira ee ku aaddan caafimaadka maskaxda oo ay ka midka tahay cayimida miisaaniyada, waqtiga iyo mas'uuliyadaha kala duwan ee saamilayaasha qeybta ka ah meel marinta tallaabooyinka iyo barnaamijyada;**
- **Dejinta iyo meel marinta siyaasad qaran oo ku aaddan bixinta adeegyada rasmiga ah iyo kuwa aan rasmiga ahayn, taasoo nidaaminaysa adeegsiga xarumaha gaarka loo leeyahay iyo kuwa diinta ee lagu hayo dadka qaba xanuunka dhimirka; siyaasadu waa in ay si cad u qeexdaa qaababka dadka lagu geynayo xarumaha caafimaadka ee rasmiga ah iyo kuwa aan rasmiga ahayn; waana in sidoo kale ay cadeysaa in aan la ogolaan karin in qof xoog lagu geeyo ayadoo lagu saleynayo xanuunka dhimirka ee uu qabo;**
- **Waxaa intaa dheer in laga shaqeeyo sameynta xarumo bulshadu leedahay oo si ogolaanshahooda ah ay ku tagaan dadka qabatima daroogooyinka, iyo xaqiijinta in daweynta ay halkaasi ka helaan ay tahay mid caafimaad ahaan sax ah, oo si xor ay dadka u tagaan, isla markaana waafaqsan heerarka caalamiga ah.**

## KU SOCOTO GUDIGA QARAN EE XIRFADAHA CAAFIMAADKA

- **Sameynta iyo joogteynta diiwaanka xarumaha gaarka loo leeyahay iyo kuwa sanca dhaqameedka ee ay ku jiraan ama isugu tagaan dadka qaba xanuunka dhimirka;**
- **Xaqiijinta in xarumaha caafimaadka ay la jaanqaadayaan tilmaamaha ku aaddan adeegsiga xariga, raacida tilmaamahaasi waa in shardi looga dhigaa xarumaha cusub ee la diiwaangelinayo oo shatiga la siinayo.**

## KU SOCOTO GUDIGA GARSOORKA IYO XAAKIMKA UGU SAREEYA

- **Ka mamnuucida maxkamada heer degmo ee Hargeysa in ay xukunto geynta dadka qaba xanuunka dhimirka ee aan ogolaanshaha laga haysan xarumaha gaarka loo leeyahay, iyo in maxkamadaasi ay go'aamiso in dadka qaabkaasi lagu geeyay xarumaha ay ka bixi karaan markii ay doonaan;**
- **Xaqiijinta in maxkamad kasta oo la geeyo codsi ah in qof aan amar laga haysan la geeyo xarun dadweyne ama mid gaar loo leeyahay, uu qofkaasi ama cid mataleysa hor yimaado maxkamada oo ay dhagaysato; iyo in xarigaasi la doonayo maadaama uu qofka muujiyay hab-dhaqan khatar gelin kara naftiisa ama dadka kale, balse aanay ku iman oo keliya inuu qabo xanuunka dhimirka, iyo in la sameeyay baaritaan dhanka maskaxda ah, iyo in xarig kasta uu qaadanayo muddo kooban, isla markaana ay maxkamadu si joogta ah dib u eegis ugu sameyneyso;**
- **In iskaashi la sameeyo si mas'uuliyiinta garsoorka, xirfadlayaasha caafimaadka maskaxda iyo mas'uuliyiinta dowladda ee caafimaadka, si ay dib u eegis ugu sameeyaan dhammaan kiisaska dadka ku nool xarumaha dhimirka ee dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahay, lana sii daayo kuwa halkaasi ku jira ogolaansha la'aantooda.**

## KU SOCOTO GUDIGA QARAN EE XUQUUQDA AADANAHA

- Sii wadida sameynta kormeerada madaxa bannaan ee dhammaan goobaha dadka lagu hayo, oo ay ka midka yihiin xarumaha dhimirka ee dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahay. Kormeerku waa inuu ahaadaa mid joogta ah, aan la sii shaacin, waana in shaqaalaha gudiga la siiyaa galaangal aan la xadidin oo ay si gaar ah ula kulmi karaan dhammaan bukaannada, ayna u eegi karaan faylashooda, iyo weliba dhismaha xarumaha. Gudigu waa inuu dabagal sameeyaa si uu u xaqiijiyo in aan laga aargoosan dadka ku jira xarumaha ee la kulmay. Gudigu waa inuu si shaac baxsan usoo bandhigaa waxyaabaha uu ku ogaaday kormeeradaasi;
- Xaqiijinta in shaqaalaha gudiga ay helaan tababar joogta ah oo ku haboon sidii ay u sameyn lahaayeen cilmi baaristooda ku aaddan tacaddiyada loo geysto dadka qaba xanuunka dhimirka.

## KU SOCOTO DOWLADDA SOMALILAND

- In si shaac baxsan ay u ballaan qaado u hogaansamida mabaadii'da asaasiga ah ee lagu qeexay Axdiga Qaramada Midoobay ee ku aaddan Dadka Naafada ah iyo in ay ka shaqeyso sidii xuquuqdaasi ay ugu dari lahayd sharciga u yaalla Somaliland;
- Xaqiijinta in si wax ku ool ah ay u wada shaqeeyaan saamilayda muhiimka ah ee dowladda, oo ay ka midka yihiin Wasaaradda Caafimaadka iyo Gudiga Qaran ee Xirfadlayda Caafimaadka, gaar ahaan qeybaha kormeerka iyo dusha kala socoshada dhammaan xarumaha caafimaadka ee ay ku jiraan dadka qaba xanuunka dhimirka;
- Marka la qaabeynayo mashaariicda caafimaadka dhimirka, waa in mudnaan sareysa la siiyaa sameynta, maalgelinta iyo bixinta adeegyo badan oo ay bulshada u fidiso dadka qaba xanuunka dhimirka, uuna ka mid yahay in caafimaadka maskaxda lagu daro daryeelka caafimaadka asaasiga ah. Adeegyadaasi waa in lagu saleeyaa qiyamka sinaanta, madax bannaanida iyo ka qeyb gelinta dadka qaba xanuunka dhimirka. Ka hortaga in dadka lagu xareeyo xarumaha dhimirka waa in ay qeyb muhiim ah ka ahaato qorsheyn kasta oo loo sameynayo daryeelka caafimaadka maskaxda, waana in saamilayaasha muhiimka ah oo ay ka mid yihiin dadka qaba xanuunka dhimirka lagu marti qaadaa ka qeyb galka sameynta qorshayaashaasi;
- Sameynta hannaan kormeer oo wax ku ool ah, oo uu ka mid yahay u dhisida hay'ad gaar ah oo madax bannaan, taasoo dusha kala socota xaaladaha dadka qaba xanuunka dhimirka ee laga xayiray xuquuqdooda xoriyada shakhsiga ah. Hay'adani waxa ay hoostagi kartaa Wasaaradda Caafimaadka ama cid kale, balse waa in ay lahaataa awood ay kula socon karto in xarumaha dadweynaha, kuwa gaarka loo leeyahay iyo kuwa dhaqanka ay raacaan nidaamka. Kormeerayaasha waa in la siiyaa galaangal aan xadidneyn oo ay u helaan xarumaha iyo dadka ku nool, waana in ay xoogga saaraan adeegsiga xariga, qasab ku xirida, ciqaabta iyo karantiilka. Xaqiijinta in aanay jirin wax aargoosi ah oo lagula kaco dadka xarumaha ku jira ee la kulmo kormeerayaasha. Waxyaabaha lagu ogaado kormeerka waa in lala wadaagaa hay'adaha ay khuseyso, sida Gudiga Qaran ee Xuquuqda Aadanaha;
- Ku casuumida wakiillada Qaramada Midoobay u qaabilsan jirdilka iyo ciqaabaha kale ee bani'aadan-nimada ka baxsan, xuquuqda dadka naafada ah, iyo xaqa uu qof waliba u leeyahay inuu ka faa'iideysto heerka ugu sareeya ee caafimaadka jirka iyo maskaxda, iyo Kooxda Shaqada ee Xarriga aan loo meel dayin, in ay soo booqdaan Somaliland. Waa in loo ogolaadaa in galaangal aan xadidneyn ay u helaan xarumaha dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahay iyo dadka ku noolba, ayadoo la xaqiijinayo in aanay jirin wax aargoosi ah oo lagula kaco dadka xarumaha ku jira ee ay la kulmaan;

- **Xaqiijinta in dadka qaba xanuunka dhimirka iyo ururada matala ay si buuxda uga qeyb qaataan qorsheynta, fulinta iyo kormeeridda mashaariicda dowladda ee horseeda shaqaaleynta, wanaaga bulshada iyo noolasha xorta ah;**
- **Ayada oo la tashaneyso dadka qaba xanuunka dhimirka iyo ururada matala, waa in ay wanaajisaa tirakoobka dadka qaba xanuunka dhimirka iyo naafonimada noocyadeeda kale, si ay ugu adeegsato macluumaadka ku aaddan go'aannada siyaasadda.**

## KU SOCOTO MAAMULKA QEYBAHA CAAFIMAADKA MASKAXDA

- **Fulinta tilmaamaha ku aaddan ogolaanshaha xog ogaalnimada iyo madax bannaanida ku saleysan, iyo adeegsiga xariga. Xaqiijinta in aanu jirin xarig ku yimid ogolaansho la'aan iyo in adeegsiga xariga lagu saleeyo xanuunka dhimirka oo keliya;**
- **U tababarida shaqaalaha, oo ay ka midka yihiin howlwadeennada iyo waardiyayaasha, qaababka ku salaysan xuquuqda aadanaha ee loo daweeyo xanuunka dhimirka, gaar ahaan ogolaanshaha xog ogaalnimada iyo madax bannaanida ku saleysan;**
- **U tababarida shaqaalaha qaabka bukaanka loo dejiyo. Shaqaaluhu waa in ay ku dadaalaan qaab kasta oo ka duwan in bukaanka la xiro, oo ay ka midka tahay in loo kaadiyo inta uu ka "qaboobayo", in hadal qancin loo sheego, ama lala xaajoodo si xiisadda markaasi taagan loo qaboojiyo. Maamulka waa inuu xaqiijiyo in marka la xareynayo bukaanka lagala hadlo qaabka loola dhaqmayo.**
- **Dusha kala socoshada ku dhaqmida tilmaamaha ku aaddan xakameynta aan jeebeynta ahayn, keydinta diiwaan sax ah iyo in dib u eegis joogta ah ay ku sameeyaan dhacdooyinka xariga lagu adeegsaday;**
- **Shaqaalaha aan u hogaansamin siyaasadaha ku aaddan xariga iyo qasab ku haynta waa in lagu qaadaa tallaabooyin edbin ah, oo gaarsiisan ilaa shaqa ka eryid, haddii ay ku kacaan falal dembiyeed ka dhan ah bukaannadana, waa in maxkamad dembiyeed lasoo taagaa;**
- **Fududeynta kaalmo sharci oo ku filan, kuna haboon dadka qaba xanuunka dhimirka ee ku nool xarumaha;**
- **Sameynta iyo hirgelinta tilmaamo mudnaanta siinaya sidii looga dhigi lahaa xarumaha kuwo galaangal loo leeyahay, gaar ahaan in warqadaha ogolaanshaha ay yihiin kuwo si fudud lagu heli karo, isla markaana la aqrin karo;**
- **Sameynta adeegyo waxbarasho oo ku filan kuna haboon gudaha xarumaha;**
- **Xaqiijinta la talin ku filan kuna haboon bukaan jiifka iyo bukaan socodka, kuwaas oo ku dhisan ogolaansho xog ogaalnimo iyo madax bannaani ku saleysan;**
- **Barida qoysaska baahida iyo xuquuqda dadka qaba xanuunka dhimirka iyo ka qeyb gelintooda daryeelka bukaannada ay qaraabada yihiin;**
- **In la sii wado hiigsiga sidii ay bulshada u heli lahayd adeegyada bukaan socodka, daryeelka maalinta ah, iyo bukaan jiif raali ku yimid oo muddo kooban qaata, halkii ay dadka xarumo ku xareysnaan lahaayeen muddo dheer.**

## KU SOCOTO GARSOORKA, BOOLISKA, IYO SARAAKIISHA XABSIYADA

- Xoojinta hay'adaha hadda jira, ayadoo si wax ku ool ah wax looga qabanayo cabashada dadka qaba xanuunka dhimirka. Tani waa in ay qeyb ka ahaataa tababar joogta ah oo loo fidiyo saraakiisha garsoorka, booliska iyo xabsiyada, iyo wanaajinta qaabka ay dadka qaba xanuunka dhimirka ku heli karaan kaalmada booliska iyo maxkamadaha, si loo xaqiijiyo in ku xareyntooda xarumaha ay ku timaado ogolaanshahooda xog ogaalnimo iyo madax bannaani ku yimid, diidida xariga iyo soo gudbinta dacwadahooda ku aaddan xadgudubyada. Xaqiijinta baarida iyo maxkamadeynta dadka lagu eedeeyo xadgudubka xuquuqda aadanaha. Ka ilaalinta dadka soo gudbiya dacwadaha in ay la kulmaan aargoosi;
- Waa in la cuna qabateeyo ama la xiraa xarumaha lagu helo in ay ku kacaan tacaddiyada waaweyn;
- In xarig kasta oo aan ku iman ogolaansho uu suuragal noqdo keliya ayadoo la raacayo go'aanka hay'ad garsoor madax bannaan, oo hab sharci ah loo maray, kaasoo lagu saleeyay hab-dhaqan khatar muuqata gelin kara qofka naftiisa ama dadka kale, balse aan ku dhisneyn oo keliya in uu qofka qabo xanuunka dhimirka; waa in xarigaasi uu socdaa muddo kooban oo uu sharciga qabo, isla markaana marwaliba ay maxkamadu dib u eegis ku sameyn karto.

## KU SOCOTO BAARLAMAANKA SOMALILAND

- Sameynta sharci ku aaddan caafimaadka maskaxda kaasoo waafaqsan heerarka caalamiga ah iyo Axdiga Qaramada Midoobay ee ku aaddan Dadka Naafada ah;
- Aqoonsiga qodobka sharciga ee dhigaya in dadka naafada ah ay leeyihiin xuquuq la siman dadka kale, ayna isticmaali karaan xuquuqdaasi;
- Aqoonsiga in xarun ku haynta ku saleysan naafanimada ay tahay faquuq, iyo in qof aan ogolaansho laga helin xarun lagu hayo ay ka dhigan tahay xarig aan loo meel dayin;
- Sameynta sharci mamnuucaya falalka xarumaha xanuunka dhimirka ee dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahay ee loo aqoonsado in ay meel ka dhac ku yihiin heerarka xuquuqda aadanaha, kuwaasoo ay ka midka yihiin jeebeynta, daweynta aan ogolaanshaha loo haysan, adeegsiga xariga, iyo karantiilka ciqaabta ah, howl fududeyska ah ama lagu saleeyay in qofku qabo xanuunka dhimirka. Sharcigu waxa uu qeexi karaa xaaladaha gaarka ah ee qofka si kumeel gaar ah loo xiri karo, ama dadka kale laga sooci karo, waana in xaaladan loo adeegsadaa si siman ayadoo aan la eegeyn in qofku naafa yahay iyo in kale;
- In laga saaro dhammaan sharciyada dowladda iyo qoraaladeeda kalmadaha aflagaadada ah sida "dadka maskaxda ka jiran" iyo wixii la mid ah.

## KU SOCOTO MAAMULKA XARUMAHA GAARKA LOO LEEYAHAY EE LAGU HAYO DADKA QABA XANUUNKA DHIMIRKA

- In si degdeg ah loo joojiyo oo la mamnuuco adeegsiga jeebeynta;
- Xaqiijinta in dadka ku jira xarumaha ay halkaasi ku joogaan rabitaankooda, ayna si xor ah usoo geli karaan ugana bixi karaan, ay ogolaansho xog ogaalnimo iyo madax bannaani ku dhisan ka bixin karaan dawooyinka la siinayo, ayna diidi karaan dawooyinka ayagoo aan wax ciqaab ah kala kulmeyn arrinkaasi, iyo xaqiijinta in dhammaan dadka ku jira xarumaha ay ogsoon yihiin xuquuqdooda;

- **In tirada ugu badan ee macquul ah la gaarsiiyo shaqaalaha xirfadda leh ee ka howlagala xarumaha, iyo xaqiijinta in dhammaan shaqaalaha oo ay ku jiraan waardiyayaasha ay helaan tababar ku filan oo ku haboon sidii ay ugu adeegi lahaayeen dadka qaba xanuunka dhimirka, kaasoo ku saleysan mabda'a ogolaanshaha xog ogaalnimada iyo madax bannaanida ku dhisan;**
- **U tababarida shaqaalaha qaabka bukaanka loo dejiyo. Shaqaaluhu waa in ay ku dadaalaan qaab kasta oo ka duwan in bukaanka la xiro, oo ay ka midka tahay in loo kaadiyo inta uu ka "qaboobayo", in hadal qancin loo sheego, ama lala xaajoodo si xiisadda markaasi taagan loo qaboojiyo. Maamulka waa inuu xaqiijiyo in marka la xareynayo bukaanka lagala hadlo qaabka loola dhaqmayo.**
- **Hirgalinta in si dhab ah loogu dhaqmo tilmaamaha ku aaddan xaaladaha gaarka ah ee ay tahay in la adeegsado xakameynta aan jeebeynta ahayn iyo karantiilka, keydinta diiwaan sax ah iyo in dib u eegis joogta ah ay ku sameeyaan dhacdooyinka xariga lagu adeegsaday. Xaqiijinta in xarig aan ogolaansho loo haysan aanu ku iman in qofka uu qabo xanuunka dhimirka;**
- **Fududeynta kaalmo sharci oo ku filan, kuna haboon dadka qaba xanuunka dhimirka ee ku nool xarumaha;**
- **Sameynta adeegyo waxbarasho oo ku filan kuna haboon gudaha xarumaha. Sameynta qaabab hal abuur ah oo lagu dhiirigelinayo dadka qaba xanuunka dhimirka in ay bartaan xirfado;**
- **In la sii wado hiigsiga ku aaddan adeegyada bukaan socodka, daryeelka maalinta ah, iyo bukaan jiif raali ku yimid oo muddo kooban qaata, halkii ay dadka xarumo ku xareysnaan lahaayeen muddo dheer.**
- **Xaqiijinta la talin ku filan kuna haboon bukaan jiifka iyo bukaan socodka;**
- **Barida qoysaska baahida iyo xuquuqda dadka qaba xanuunka dhimirka iyo ka qeyb gelintooda daryeelka bukaannada ay qaraabada yihiin.**

## KU SOCOTO DEEQ-BIXIYEYAASHA IYO HAY'ADAHA CAALAMIGA AH EE KA SHAQEEYA CAAFIMAADKA

- **Ku taageerida dowladda Somaliland iyo ururada dadka naafada ah maalgalin iyo kaalmo dhanka farsamada ah, kuwaas oo loogu baahan yahay ilaalinta iyo wacyi gelinta ku aaddan xuquuqda ay leeyihiin dadka qaba xanuunka dhimirka;**
- **Taageerida dadaalada caafimaadka maskaxda loogu darayo barnaamijka daryeelka caafimaadka asaasiga ah ee hadda jira iyo kan mustaqbalkaba;**
- **Ku dhiirigelinta dowladda Somaliland in dhaqaale ku filan ay u qoondeyso waaxda caafimaadka maskaxda, gaar ahaan dhaqaalaha lagu taageerayo xarumaha qaran ee caafimaadka maskaxda, xoojinta tayada daryeelka caafimaadka asaasiga ah iyo sameynta dadaalo lagu taageerayo bulshada;**
- **Taageerida dadaalada lagaga mamnuucayo jeebeynta dhammaan xarumaha dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahay ee Somaliland, ayadoo gacan laga geysanayo tababarka ku haboon shaqaalaha xarumaha, ka shaqeynta in la kordhiyo tirada shaqaalaha, caawinta sidii dawo joogta ah loo heli lahaa iyo taageerida dadaalada lagu dhisayo xarumaha bulshada u adeega;**
- **Taageerida sameynta ururada u dooda xuquuqda dadka naafada ah, oo ay ka midka yihiin kuwa u dooda xuquuqda dadka qaba xanuunka dhimirka.**

## KU SOCOTO HAY'ADDA QARAMADA MIDOOBAY EE CAAFIMAADKA ADDUUNKA (WHO)

- **Sameynta tababaro joogta ah oo ku aaddan caafimaadka maskaxda ee Somaliland;**
- **Ku darida qeybaha caafimaadka maskaxda tababarada ay u fidiso shaqaalaha caafimaadka bulshada, gaar ahaan haweenka ka shaqeeya caafimaadka ee ay tababarto hay'adda WHO;**
- **Taageerida dadaalka lagu xaqiijinayo in dawooyinka dhimirka mar kasta laga heli karo xarumaha caafimaadka maskaxda ee dhammaan cisbitaallada guud ee Somaliland;**
- **Ku dhiirigelinta dowladda Somaliland in dhaqaale ku filan ay u qoondeyso waaxda caafimaadka maskaxda, gaar ahaan dhaqaalaha lagu taageerayo xarumaha qaran ee caafimaadka maskaxda, xoojinta tayada daryeelka caafimaadka asaasiga ah iyo sameynta dadaalo lagu taageerayo bulshada.**

# "Loo Jeebeeyay Sidii Maxaabiis"

## Tacaddiyada ka dhanka ah Dadka Cudurada Dhimirka Qaba ee ku nool Somaliland

Rabshadihii iyo jah-wareerkii ka dhashay dagaalkii sokeeye, adeegyada caafimaad oo aan jirin iyo cunista badan ee jaadka, ayaa dhammaantood ah kuwa keenaya baahida taagan ee ay Somaliland u qabto daryeel tayo leh oo loo helo caafimaadka maskaxda. Sidaa oo ay tahayna, dadka qaba xanuunka dhimirka ama u baahan daryeellada kale ee caafimaadka maskaxda, ayaa inta badan ay dowladdu faraha ka qaadaa, iyagoo iskood u noolaada ama inta badan ku tiirsan qaraabo aan macluumaad badan ka haysan xaaladooda caafimaad, isla markaana aanan haysan cid caawisa ama ka taageerta qofkooda qaba xanuunka dhimirka.

Sanadihii dambe, waxaa afarta xarumood ee dadweynaha ee caafimaadka maskaxda ee aan haysan dhaqaale ku filan, isla markaana ku baahsan Somaliland kusoo biiray xarumo badan oo gaar loo leeyahay, si gaar ahna ugu soo batay magaalada Hargeysa. Ilaa iyo hadda, ma jiro baaritaan ay dowladdu ku sameysay sida loola dhaqmo dadka xarumahaasi lagu hayo.

*Warbixinta: Loo Jeebeeyay Sidii Maxaabiis*, ayaa diiwaangelisay qaabka ragga qaba ama looga shakiyay xanuunka dhimirka, ama kuwa aadka u qayila, si ogolaanshahooda ka baxsan loogu hayo xarumaha caafimaadka maskaxda ee dadweynaha ama kuwa gaarka loo leeyahay, halkaasi oo ay kula kulmaan xadgudubyo noocyo kala duwan ah.

Halkii ay ka heli lahaayeen daryeel ama soo kabsasho ay raali ka yihiin, ayaa dadka lagu hayo xarumaha waxaa lagula kacaa daweyn qasab ah, xarig muddo dheer ah, xadgudubyo jirka ah oo ay ka mid yihiin garaac, cariiri, iyo nadaafad xumo. Hannaanka asaasiga ah, dusha kala socoshada garsoorka iyo qaababka ay cadaalad ku heli karaan ayaan dhammaantood jirin. Inta badan xarumahan ayaa bixiya adeegyo aad u yar, mana badna hawlaha micnaha leh ee ay u sameeyaan dadka lagu hayo, taasoo sii badinaysa dareenka ay ka qabaan maxbuusnimada iyo rajo la'aanta.

Mas'uuliyiinta Somaliland waa in ay si degdeg ah u mamnuucaan falalka xadgudubka ah, sida jeebeynta, waana in ay dusha kala socdaan xarumaha caafimaadka dhimirka si aanu xadgudub uga dhicin. Mustaqbalka fogna, dowladda oo kaashaneysa hay'addaha caalamiga ah ee ay howlwadaaga yihiin, waa in ay sameysaa xarumo bulshada ay leedahay oo iskaa wax u qabso ah, kuwaasi oo adeeg loogu fidiyo dadka qaba xanuunka dhimirka.



*(Kor) Silsilado ka laalaada dariishad la daday, taasoo ku xirta qol si ciqaab ahaan ah loogu xiro dadka ku nool xarunta Horizon Social Assistance Development Organization, Hargeysa, 29-kii bishii Luuliyo 2015.*

*(Horay) Mid ka mid ah dadka lagu hayo xarunta gaarka loo leeyahay ee Raywan ee ku taalla magaalada Hargeysa, oo lugtiisa silsilad lagula xiray deyrka xaruntaasi, 29-kii bishii Luuliyo 2015.*

**© Sawirka, Zoe Flood ayaa si gaar ah ugu qaaday Human Rights Watch**

**hrw.org**